Golaha Waxbarashada Dugsiyada Dadweynaha Portland Wuxuu u Codeeyey Soo Jeedintii La Tixgeliyey ee Caafimaadka, Nabadgelyada iyo Ballanqaadkii Maaliyadeed ee Dib-u-Cusbooneysiinta ee Codeynta Bisha Maayo

Golaha Waxbarashada Dugsiyada Dadweynaha Portland wuxuu caawa meel mariyey qaraar maalgalineed oo ballaaran kaasi oo loo gudbiyey cod bixiyaasha Portland sidii ay ugu codeyn lahaayeen maalgalin baaxad weyn codeynta dhici doonta bisha Maayo 16keeda, 2017. Maalgalinta dhaqaale waa tii labaad ee nooceeda ah ee la soo jeediyo si isdaba joog ah, si loogu cusbooneysiinayey si dhammeystiran dhismayaasha iskuulada degmada oo dhan dhowrka sanno ee soo socda.

Dugsiyada Dadweynaha Portland(PPS) waa iskuulada degmada ugu ballaaran Gobolkan Oregon, in ka badan 90 dhisme iskuul oo ay wax ka bartaan tiro dhan 48,500 oo arday. Da'da dhismayaasha Dugsiyada Dadweynaha Portand waxaa celcelis ahaan lagu qiyaasay inay jiraan 77 sanno- qaarkoodna ay kaba weyn yihiin 100 sanno.

Iskuuladani gaboobayaa waxay u baahan yihiin dayactir iyo in kor loo qaado si ardeydeena loo siiyo jawi cusub oo ay wax ku baran karaan iyadoo wax laga qabanayo meelaha ay khatartu ka jirto. Tijaabadii Lead-ka sanadkii 2016 waxay caddeysay in iskuulada intooda badani dhuumahooda biyaha qaada ee la tijaabiyey ka sareeyaan heerka Hay'ada Ilaalinta Deegaanka u dhigtay. Sidoo kale saqafyada badankoodu ay dhaafeen waqtigii loogu talogaly in la isticmaalo, iyadoo qaarkoodna ay si joogta aha ay biyaha u sii daayaan. Qalabka Digniinta Dabka iyo Dab Damiskuna iskuulada intooda badan ayna ahayn kuwa ku filan.

Maxay qaban doontaa maalgalinta la soo jeediyey haddii la ogolaado?

Maalgalinta la soo jeediyey ee dhan $790,000,000 waxaa lagu maalgelin dib u dhiska Dugsiyada Sare ee Benson iyo Madison, iyo iyadoo dib hagaajin buuxda lagu sameynayo Dugsiga Sare ee Lincoln iyo Dugsiga Dhexe ee Kellogg.

Qiyaastii miisaaniyada 30% ee mashruucyadan waxaa si dhammeystiran wax looga qaban arrimaha caafimaadka iyo nabadgelyada, kuwaas oo ay ku jiraan lead, asbestos abatement, hagaajinta saqafyada, kor u qaadista waxyaabaha lagaga hortago dhulgariirka iyo in kor loo qaado oo ay iskuuladu noqdaan kuwa si dhib yar loo soo gali karo iyada oo la raacayo xeerkii Naafada Maraykan.

Haddii ay cod bixiyaashu u codeeyaan maagalinta la soo jeediyey waxa lagu kharash gareyn qorsheynta kor u qaadista Dugsiyada Sare ee Cleveland, Jefferson, iyo Wilson oo qeyb ka ah iskuulada xige ee lagu sameynayo dib u casriyeynta.

Waxaa intaas dheer haddii la ansixiyo maalgalintan, ugu yaraan $150 malyuun waxaa lagu kharash gareyn doonaa mashaariicda degmada ee caafimaadka iyo nabadgelyada, oo ay ka mid yihiin:

- In la bedelo qasabadihii biyaha qaadayey si loo yareeyo lead-kii, kor loo qaado tay'ada biyaha iyadoo la yareynayo baahida isticmaalka biyaha caagadaha ku jira;
- In laga fujiyo ama dahaadho khatarta ranjiga keeni karo iyo asbestooska;
- In kor loo qaado qalabka digniinta dabka iyo/ama qalabka dabka lagu damiyo;
- Dib u hagaajin lagu sameeyo ama la bedelo safqayda iskuulada ee biyaha siideynaya ee xaaladoodu hooseyso;
- In kor loo qaado sidii si dhib yar dadka naafada ahi ay u soo gali lahaayeen iskuulada;
- Kor u qaadista seeska dhismayaasha iyo meelaha hawadu ka soo gasho fasalada iyadoo hoos loo dhigayo kiimikada gaaska ee radon; iyo
- In la xoojiyo nabadgelyada iskuulada iyo ammaanka.

Haddii la ansixiyo soo jeedintani, Dugsiyada Dadweynaha Portland(PPS) sidoo kale waxa ay ka heli doonaan Gobolka $8 malyuun gargaar lacageed u dhigma, iyadoo maalgalintaasi lagu kharash gareyn doono arrimaha caafimaadka iyo amniga oo dheeraad ah. Haddii la ansixin waayo soo jeedinta maalgalinta, kharashkaas waxaa loogu deeqi doonaa dugsiyada degmo kale.

Muxuu inagu joogaa ballanqaadkan maaliyadeed haddii la ansixiyo?

Celceliska xadiga cashuurta maalgalinta la soo jeediyey waxa lagu qiyaasayaa inuu noqdo $0.68 midkiiba $1000 marka la qiimeeyo qiimaha muddo 30 sanno ah. Xadiga cashuurta ee lagu qiyaasay inuu noqdo $1.40 midkiiba $1,000 afarta sanno ee ugu horeeya, iyadoo wixii ka dambeeya uu hoos u dhacayo. Guri lagu qiimeeyey $200,000 kharash bilowga ah ee sanadkii wuxuu noqon doonaa qiyaas ku dhow $280. Sanadkii celceliska guud wuxuu kharashkiisu noqonayaan $136. Isugeynta cadadka asalka maalgalinta la ballanqaaday ee la ogolaado doorashadani kama badan karto $790 malyuun.

Masuuliyada Isla Xisaabtanka

Ballanqaadkii maaliyadeed ee horumarinta baaxada lahaa sanadkii 2012, kooxo muwaadiniin oo madax bannaan kana mid ah bulshada ayaa dib u eegis ku sameynayey warbixinta iyo iyaga oo hantidhowr ku sameynayey sidii loo kharash gareeyey maalgalintii la soo jeediyey doolar kasta oo ka mid ahaa afartii biloodba mar, iyadoo dadweynaha la siinayey xisaab celin nadiif ah ilaa iyo intii uu dhismihu ka dhammaanayey.